

## **Xanuun jebinta marka la qaadayo tijaabada xididka.**

Sida ku cad hanaankeena shaqo baa waxaa ah in caruurta ka yar da'da 7 sanno ay mar waliba helaan fursad lagu siiyo daawada xanuun jebinta marka laga qaadayo tijaabada xididka. Waxaa xanuunjebin loo isticmaalayaa sharootada ama kiriimka (bomaatada) xanuunjebita ee EMLA®.

Waxaan ku dhejineynaa ugu yaraan laba sharooto ama kiriim xusulka gacanta, garabka ama cagaha.

Sharootada ama kiriimka waa iney ku dheganaataa maqaarka 1 saac, mararka qaarna in ka badan, si ay u siiso xanuun jebinta ugu wanaagsan.

Haddii aad rabtaan idinka ayaa iska qaadi kara (fujinkara) sharootada, haddii kalena u sheeg shaqaalaha cusbitaalka oo ku caawinaya.

Marka laga qaado sharootada waa inuu qofku sugaa 10-15 daqiiqadood intaan la qaadin tijaabada.

Saamaynta suuxdinta jidhka waxay soconeysaa ku dhawaad 2 saacadood kadib marka sharootada laga qaaday jidhka.